

Somali

**Garsoorka Dambiyada  
Dhalinyarada:  
Waxyaabaha La Rabo Inuu  
Waalidka Ogaado**

Youth Criminal Justice: What Parents Should Know

**Mashruuca Hoggaanka Iskuxidhka  
Bulshada ee Qoysaska (CLNF)**



CRIME  
PREVENTION  
OTTAWA



PRÉVENTION  
DU CRIME  
OTTAWA



WORLD SKILLS  
EMPLOYMENT CENTRE D'EMPLOI  
COMPÉTENCES MONDIALES

July 2019



Mashruuca Hoggaanka Iskuxidhka Bulshada ee Qoysaska (CLNF) waxaa laga maamulaayey dhanka Xarunta Shaqada Xirfadaha ee Adduunka oo ka wakiil ah Hay'adaha Maxalliga ah ee Adeegyada Isbahaysiga Soo-galootinka (LASI). Waxaa maalgeliya Ka-Hortagga Dembiyada Ottawa waxaana hadda bixiya Xarunta Soomaalida ee Adeegyada Qoysaska. Mashruucan waxaa la diyaariyey ayadoo lala kaashanayo hayado dhowr ah, xogtana waxaa la qoray kadib markii lala sameeyay wada tashi xubnaha bulshada iyo hayadaha adeeg bixiyayaasha.

### **Hadafka ugu weyn ee Mashruuca waa:**

- In la kordhiyo aqoonta iyo xiriirka u dhaxeeyo bulshada soo galootiga, adeegga bulshada ee guud ahaaneed iyo habka garsoorka.
- In kor loo qaado ka hortagga dembiyada.
- Iyo in la kordhiyo aqoonta iyo fahamka masuuliyada saaran waalidka iyo xuquuqda ay dhalinyaradu leedahay.

### **Buug-yarahan wuxuu kaa caawin doonaa:**

- In aad barato calamaadaha lagu garto marka dhalinyaradu halis ugu jirto in ay dembi sameeyaan iyo sidii aad uga hortegi lahayd.
- Inaad fahanto habka garsoorka iyo dembiyada Kanada.
- Iyo inaad ogaato adeegyada aad heli kartid.

**Buugan-yarahan waxaa ku jira xog ama macluumaad guud. Xogtani ma bedeli karto booskii la talin sharci. Haddii aad u baahato la talin sharci ah fadlan raadi qof qareen ah.**

**Korinta carruurta way adag tahay in la sameeyo. Weliba way ka sii adag tahay marka waalidku la kulmaan caqabado kale sida la noolaanta xaalado caafimaad, saboolnimo ku noolaanshaha, ku cusboonaanta dalka, la kulmida midabtakoor, ama aan ku hadlin Ingiriisi ama Faransiis.**

**Buug-yarahan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah waxayna bixisaa qaar istaraatiijiyado ah oo la tixgeliyo.**

## **Baro calaamadaha lagu garto marka dhalinyaradu halis ugu jiraan in ay dembi sameeyaan iyo sidii aad uga hor tegi karto**

Dabeecado badan oo dhalinyaradu leeyihin waa iska caadi. Waa inaad ka welweshaa haddii dabeecadaha qaar ka mid ah ay sii wadaan si qaab joogta ah. Waad ka hor tegi kartaa, caawimona waa heli karta ka hor intaanu ilmahaagu dhibaato kaga iman xagga sharciga. Waxaad wici kartaa 211 si aad u weydiiso wixii xog ama macluumaad ah ee ku saabsan adeegyada aad ka heli karto Ottawa.

## **CALAAMADDA DIGNIINTA #1: DHIBAATOOYINKA QOYSKA**

**Kormeerka waalidka oo yar** – In aadan garanayn saaxibada caruurtaada iyo qoysaskooda iyo adiga oo garanayn meesha caruurtaada waqtiga ku lumiyaan.

**Hab Anshaxin Iskhilaafsan** – Sida in marna aad ku ciqaabto dhaqanka xun, wax yar ka dibna aad iska indho tirta. Abaal marin la'aan dhaqanka wanaagsan. Shaqada guriga oo yar ama shaqa aan joogta ahayn, iyo inaad u sheegtid caruurtaada inay u dhaqmaan si ka duwan adiga dhaqankaaga.

**Dhibaato ka jirta Xiriirka Qoyska** – Sida qilaaf ka jira qoyska dhexdiisa, dagaal, xadgudub ama dayac ka jira xagga guriga; ayadoo waalidku is furay ama hal waalid guriga jooga; ama inaad leedahay waalid ama walaalo lug ku leh dembiyo, cabitaanka qamri ama isticmaalka daroogada.

# MAXAAD KA QABAN KARTA

**Si wanaagsan u Ilaali, una kormeer caruurtaada** – Ogow caruurtaada saaxibadooda iyo qoysaskooda, waa inaad taqaanaa caruurtiina meesha ay waqtiga ku qaataan; marka aadan joogin gurigana caruurtaada uga tag qof masuul ah.

**Ogow sharciyada ku saabsan kaga tegidda carruurta keligood xagga guriga.** Sharci ahaan, carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano lagagama tegi karo guriga keligood ama in la waydiiyo inay keligood daryeelaan walaalahood. Iyadoo ay ku xidhantahay heerka garaadka ilmahaaga, carruurta da'doodu ka weyn tahay 12 sano way joogi karaan guriga keligood wayna daryeeli karaan walalahood (Xeerka Ilmaha iyo Adeegyada Qoyska). Waa dembi inaad guriga uga tagto ilmo 10 sano ah keligiis ama keligiis uu daryeelo walaalihiis (Xeerka Dambiga Canada).

**U tarbiyaday ciyaalkaaga qaab aan is burinayn oo is waafaqasan** – Kala hadal caruurta xeerarka, waxa laga filanayo, anshaxa iyo qiyaamka nolosha; caruurtaada sii taageero niyadeed; ku abaal mari dhaqanka wanaagsan; ha ka qayb qaataan shaqada joogtada ee guriga, oo masuuliyada guriga qaybtooda qaataan.

**Dhis xirriirka iyo isku xirnaanta qoyska** – Tus jacayl iyo Kalkacayl caruurtaada; waqti fiican wada qaata caruurtaada; qorshee howlo qoysku ka wada qayb qaataan. U ahaw caruurtaada taageere wanaagsan ee qoyska.

**U ahaw caruurtaadaa tusaale wanaagsan oo ay ku daydaan** – Samay dhaqanka wanaagsan ee ku dayashada mudan oo aad rabto inaad barto caruurtaada. Yeelo qoys leh xasilooni dhaqaale iyo mid caadifadeed; tus xushmad, naxariis iyo dulqaad saaxiibada iyo qoyskaaga. Ku dedaal caafimaad iyo hab nololeed isku dheeli tiran. Caawimo ka hel ama ka raadso adigoo isticmaalaya adeegyada latalinta; qaado casharo sida ciyaalka loo koriyo ama sida loo xaliyo khilaafaadka.

## **CALAAMADDA DIGNIINTA #2: DHIBAATOYINKA DABEECADAHA**

**Sal-fudaydnimo , ku dhiirasho  
waxyaabaha halista ah iyo  
dabeecadaha raaxaysi doonka  
ah** Waxaa ka mid ah ilmahaaga



oo ku lug leh dagaal; inuu kaxeeyo baabuur isagoo cabsan ama daroogo isticmaalay; qarash gareeyo lacag aad u badan isagoo shaqo haysanin; inuu xado dukaamada; inuu guriga ka cararo; isagoo sameeya galmo dad aan xidhiidh jacayl ka dhaxayn oo kala duwan iyo galmo bilaa gal caar ah (kondhom).

**Dabeecad nasasho la'aan, xanaaq iyo mid dagaal badan –** Waxaa tusaale uu ah, ilmahaaga oo dhibaato ku hayso inay isu aqoonsado “Kanadiyan” ama aqoonsigooda dhaqameed ee asalka ah; muujiyaan isbedel lama filaan xagga shaqsiyadda, dabeecadda ama diinta uu aaminsanyahay; muran joogta ah; dhibaato xagga hurdada; burburin hantida ama inuu kugu hanjabo inuu wax ku yeeleeyo adiga iyo/ama ciyaalka ah walaalaha yihiin. Inuu caan ku noqdo xoog sheegasho iyo cagajuglayn dadka kale. Inuu diido inuu sharaxaad ka bixiyo dhaawac kaga yaal xagga jirka; qariyo ama la dhuuntaa hubka; la kulma dagaal; diido in talo la siiyo iyo in uu isticmaalo adeegyada caafimaadka maskaxda.

## **MAXAAD KA QABAN KARTA**

**La noqo caruurtaada saaxib iyo taageere si ay kuugu yimaadaan markay mucaawino u baahan yihiin –** Dhagayso caruurtaada una fiirso dabeecadahooda, si joogta ah oo si wanaagsan ula hadal; sii taageero xagga niyadda caruurtiina; isku day inaad fahamto dhaqanka ilmahaaga (Tusaale, arrimaha caafimaadka maskaxda, xadgudubka iyo cagajuglaynta).

**Si dhaqsa ah ama hore u caawi –** Wac 211 adeegyada la-talinta, caafimaadka maskaxda, maaraynta xanaaqa ama carada, la hadal waalidiinta kale si aad u hesho fikrado iyo taageero.

**Wargeli booliiska ilmahaaga maqan –** ilmaha maqan oo da'doodu ka yar tahay 16 sano in la badbaadiyo ayeey u baahan yihiin. (Sharciga adeegyada caruurta iyo qoyska).

**Wac 911 haddii aad ka welwelsan tahay arrimo ku saabsan ammaanka ilmahaaga iyo/ama naftaada.**

**Ogow xeerarka ku saabsan ogolaanshaha galmada (Xeerka dembiyada Kanada):**

- Ilmaha da'dooda tahay 11 sano iyo wixii ka yar sharciga ma ogola in heshiis galmo ah inay galaan.
- Ilmaha da'dooda tahay 12-13 sano wey siin karaan ogolaasho galmo haddii qofka kale ka weyn yahay, laakiin da'dooda farqiqa u dhexeeyo uu ka yaryahay labo (2) sano.
- Ilmaha ah 14-15 sano waxa uu fasax ku bixin karaa hawlo galmo ah haddii qofka kale ka weyn yahay laakiin faraqa da'dooda u dhaxeysaa ka yartahay shan sano.
- Ilmaha 16 jira ama ka weyn way ogolaan karaan ama raalli ka noqon karaan galmada, marka laga reebo qof awood ku leh (sida macalin dugsi ama shaqa-siye) ama ilmo la khasbayo oo laga faa'idaysto

## **CALAAMADDA DIGNIINTA #3: DHIBAATO DUGSIGA IYO SHAQADA IYO HOWLAHA WANAAGSAN**

**Xiiso la'aan dugsiaga iyo/ama shaqada –**

waxbarashada uu keeno darajo hoose; dabeecadado qallafsan xagga dugsiaga, maqnaansho, cayrin ama ka joojin dugsiaga; ka qayb gal la'aan howlaha dugsiaga; dhibaato xaga shaqada ka haysata, shaqooyin dhowr ah oo laga soo cayriyey.



**Ka qayb gal la'aan cayaaraha iyo arrimaha bulshada –** ilmahaaga oo aan ka qayb qaadan hawlaha jir-dhiska; waqti badan ayuu ku bixiyaa cayaarta gaymamka, waqti badan ku lumiya internetka, ama isagoo keliigiis joogaa; isbedel lama filaan ah lagu arko wuxuu xiiseeyo/hiwaayadaha; wuu diida inuu ka qayb qaato howlaha qoyska iyo adeega.

## MAXAAD KA QABAN KARTA

**Ogow sharciga ku saabsan imaanshaha dugsiga** – Ilmo kastoo ka weyn 6 sano waa qasab inuu tago dugsiga ilaa uu ka qalin jebiyo ama uuy gaaro da'da 18 sano (Sharciga Waxbarashada).

**Waxaad barataa Sarkaalka Xidhiidhka Dhaqanada Badan (shaqaalaha dejinta ee Dugsiga) iyo macallimiinta iskuulka ilmahaaga**– Waa inaad tagtaa ama ka qayb gashaa kulamada waalidiinta iyo macallimiinta iyo inaad ugu shaqayso iska wax uqabso howlaha dugsiga ilmahaaga dhigtaan.

**Baro luqadaha rasmiga ee dugsiga ilmahaaga dhigto si ilmahaaga adiga aysan kaaga qararin macluumaadka**

**Dhiiri geli ilmahaaga inay la yeeshaan xiriir wanaagsan iyo inay kala qayb galaan howlaha dugsiga ardayda kale iyadoo ay kor meerayaan qof masuul ah.**

**Ku dhiiri geli ilmahaaga inay isticmaalan adeegyada shaqa raadinta dhalinyarada.**

**Kala qayb gal caruurtaada madadaalada, cayaaraha iyo howlaha bulshada.**



## CALAAMADDA DIGNIINTA #4: DHIBAATOYINKA QAMRIGA IYO DAROOGADA

**Cabitaanka qamriga iyo/ama isticmaalka daroogo sharci darro ah** – ilmahaaga wuxuu cabba qamriga, sigaarka iyo/ama mariwaana (xashiishad), isticmaalaa dawooyinka xanuunka oo loo qoray qof

kale, dawooyinka aan la isu qorin oo farmashiyaha yaala (tusaale sida, Sharoobada qufaca, Benylin, Graval, kaniiniga caffeeinka); habeenkii xilli dambe buu yimaada oo wuu soo daahaa, habeenkii dibadda ayuu u baxaa waqti gaaban, ma sharxi karo urka xun ee dharkiisa ka urayaa, lacag ayuu deynsadaa, guriga waxaa laga waayaa lacag iyo waxa qiime leh, shaqsiyadiisa waxa ka muuqata isbedel lama filaan ah, tusaale sida isbedel niyadda, isbedel lama filaan xagga miisaanka, maqaarka ama jirka iyo nadaafad xumo.

## **MAXAAD KA QABAN KARTA**

**Ogow xeerarka ku saabsan qamriga iyo tubaakada.** Sharcigu ma ogola in qamri ama tubaako laga iibiyo ama la siiyo qof ka yar 19 sano (Xeerka ilaalinta Tubaakada). Sidoo kale gobolka Ontario ma ogola qof 19 sano ka yar inuu cabo, qaado ama iibsado qamri (Xeerka Liisanka Qamriga).

**Kala sheekayso caruurtaada arrimaha ku saabsan qamriga iyo daroogada.**

**Ha u ogolaan caruurtaada inay gurigaaga ku cabaan sigaar, ama qamri, ama in ay ku isticmaalaan daroogada.**

**Ha ku hayn ama ku kaydinin gurigaaga daawada xanuunka ee aan la isticmaalin ama hartay (Tusaale sida Tylenol Codeine leh, ama Fentayl)**

**Ogow sharciga ku saabsan bandowga caruurta** – Ilmo ka yar 16 sano ma joogi karo meelaha bulshadu ku kulanto ama meel ka mid ah meelaha madadaaladda dadweynaha inta u dhaxeeyso 12:00 am (saqbadhkii) ilaa 6:00 am aroornimo, haddii kale waa in waalidka ama masuulka sharciga ah la joogaa (Xeerka adeegyada ilmaha iyo qoyska). Waalidiinta haddii aanay raacin sharciga bandowka waxaa lagu oogi karaa dembi ah kan gobolka iyo ganaax gaaraya \$1000.

**Wac 211 si aad u hesho macluumaad ee ku saabsan qabatinka ama balwada maandooriyaha sida barnaamijka dhalinyarada iyo waalidka ee Xarunta Rideauwood Addiction and Family services.**

**Wac Xarumaha Booliska bulshada wixii macluumaad ku saabsan barnaamijka Ilaalinta Deriska (neighbourhood Watch).**

**Wargeli Booliiska ama dembi joojiyaasha haddaad aragtid daroogo la kala gadanayo ama hawlo kale oo aad ka shakido.**



## MA OGTAHAY?

- Waxaa jira 11 hay'adood oo u adeega dadka ku cusub Ottawa
- Waxa jira in ka badan 80 shaqaale ka caawini kara adiga iyo caruurttada sidaad ula qabsan lahayd nolosha Kanada.
- Shaqaala bixiya adeega dejinta luqado badan ayey ka helayaa.
- Wixii faahfaahin dheeraad la xidhiidh liiska xarumaha LASO ee bogga 17 aad.



## CALAAMADA DIGNIINTA #5: FIKRAD XUN OO ILMAHAAGU KA AAMINSAN YAHAY SHARCIGA

**Ilmahaaga oo u sameeya marmarsiiyo inuu jebiyo shaRciga** - ilmahaaga waxay ku eedaynayaa dambiga saboolnimada, saaxiibada, booliiska ama bulshada; waxayna qabaan in dembiga uusan qofnaa wax yeelayn.

**Ma ixtiraamaan sharciga iyo amarka** - ilmahaaga wuxuu kala kulmay booliiska waayo aragnimo xun, ma ixtiraamo sharciga iyo amarka, wuxuu aaminsanyahay in xariggu ama xabsigu uu ka dhigayo qof caan ah oo heer sare ah; uxuu aaminsan yahay in adigu waalidkii ah inaydaan ixtiraamin sharciga ama maamulka.

## MAXAAD KA QABAN KARTA

Bar carruurtaada xogta ku saabsan sharciga, xuquuqda ay u leeyihiin iyo doorka maamulka ka hor inta uusan la xiriirin booliska.

Ku dhiiri geli carruurtaada in ay si kalsooni isuku qabaan naftoodana aqoonsadaan.



## WAX KA BARO NIDAAMKA GARSOORKA DEMBIYADA KANADA

**Maadaama aad ku cusub tahay Kanada, waxay u badan tahay inaad wax yar ka taqaanid nidaamka Garsoorka dembiyada Kanada. Tanina waxay keeni kartaa inay werwer badan kugu abuurto haddi ilmahaaga dembi lagu soo eedeeyo.**

Xeerka dambiga ee Kanada waa sharciga badiba la isticmaalo Kanada markaa qofku galo dembi. Waxaana loogu talo galay in lagu ilaaliyo amaanka bulshada.

Xukuumadda federaalka oo keliya ayaa samayn karta sharciga dembiyada, dowladaha gobolladu waxay mas'uul ka yihiin hawlgelinta maxkamadda. Booliiska, xeer-ilaaliyaasha, maxkamadaha, iyo saraakiisha ilaaliya/tijaabiya dhalinyarada waxay fuliyaan sharciga. Xuquuqda sharciga waxaa ilaaliya dastuur qoran iyo xeerka xuquuqda iyo xoriyada.

Qofka waa eedlaawe ilaa denbi lagu caddeeyo si shaki la'aan ah maxkamad horteed oo meel fagaare ah lagu qaaday.

# ISKU DAY INAAD FAHANTO NIDAAMKA GARSOOKA DEMBIYADA KANADA

Dhalinyarada waa qof da'diisu u dhaxayso 12-17 sano. Bulshada ayaa xil ka saran tahay si ay u taageeri lahaayeen dhalinyarada markay korayaan. Ogow nidaamka cadaaladda dembiyada ee dhalinyarada ka hor inta ilmahaaga wax dhib ah kala kulmin sharciga. Qaybtani waxaa ku jira macluumaad ku saabsan Xeerka cadaaladda dembiyada ee dhalinyarada, xuquuqda ilmahaaga markii lagu eedeeyay wax dembi ah, iyo xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadka ee nidaamka cadaaladda dembiyada dhalinyarada ah.

## XEERKA GARSOOKA DEMBIYADA DHALINYARADA

*Xeerka garsoorka Dembiyada dhalinyarada waa sharciga lagu dhaqo dembiyada dhalinyarada ee Kanada. Dhalinyarada waxay leeyihiin xuquuq gaar ah waxaana loola dhaqmaa si ka duwan dadka waaweyn. Waxaa jira Maxkamadaha Dhalinyarada, Xarumaha Xabsiyada dhalinyarada, iyo Adeegyada Carbinta dhalinyarada.*

Adeegyadaas oo dhan waxay diirada saarayaan:

- Cawaaqib-xumo dhalinyarada garoowsiisa kana dalba inay hagaajiyaan dhibaato lagu sameeyey ama dhibbato ay ku sameeyeen bulshada.
- Barnaamijyada maxkamad ka weecinta dhalinyarada kuwaas oo sharciga jebiyey markii ugu horeysay oo galay dembiyada yar-yar, si dibedda loogaga saaro nidaamka maxkamadda.
- Si dhibta wax looga qabto kuwa gala dembiyada ugu daran.
- In waqtiga xabisga ku jiraan la yareeyo.
- Dhaqancelinta dhalinyarada jebiyey sharciga
- In dhalinyarada laga caawiyo in bulshada ku soo dhex laabtaan (dhexgalka).

## WAA MAXAY XUQUUQDA IYO MASUULIYADA WAALIDNIMO AAD LEEDAHAY?



Taageer ilmahaaga inta hawshu socoto oo ay ku jirto dhagaysiga dammaanada, dhaqancelinta, iyo dib u dhexgelinta bulshada.

Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato turjumaan (arag waxyaalaha aad heli karto bogga 18 aad).

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho warbixin ku saabsan waxa ku dhacaya ilmahaaga.

### MA OGTAHAY?

- Qofka dhalinyarada ah markuu dhamaysto barnaamijka weecinta ah, dambiga lagu oogay waa laga qaadayaa.
- Saraakiisha Booliska iyo xeer-ilaaliyayaasha waxay soo jeedin karaan karaa barnaamid ku haboon weecinta dhalinyarada ah ee ilmahaaga.
- Qofka dhalinyarada wuxuu go'aansan karaa in uu ka qaybqaato barnaamijka weecinta ama uu maxkamad tago.



### NOOCYADA DEMBIYADA UGU BADAN EE DHALINYARADA

- **Xumaan ama edeb daro** - hantida la burburiyo buufin rinjiyaynta dhismayaasha/derbiga dadweynaha.
- **Xatooyada** - xatooyada baabuurta ama dukaamada alaabta laga qaado.

- **Hanjabaad** - Hanjabaada in ay dagaalamayaan ama sawiro laga xishoodo internetka ku soo bandhigaan.
- **Jebiyaan oo uu u dhaco** - Jebinta iyo soo gelidda guri, hoos ama dhisme cidina deganayn.
- **Jebinta shuruudihii dhamaanada Xabsiga** ama amaridiido waxyaabihii laga sugayey in la sameeyo waqtii tijaabada (probation).
- **Haysaso walxo daroogada ah maamulku ilaaliyo:** sida qaadsado mariwaana (xasiishad) iyo/ama daroogo



## DEMBIYADA UGU WAAWAYN EE AAN BADNAYN OO DHALINYARADU CAANKA KU TAHAY

- **Weerar Ku qaadid** - Dagaalka, weerar kooxeed, suuragal ah ku lug lahaanshaha koox gang ah.
- **Ku xadgudubka galmada** - Taabasho aan la rabi iyo galmo la rabin.
- **Haysashada hub ah oo ujeedo khatar ah** - Sidasho mindi ama bastoolad/qori.
- **Boobka** – Boob koox koox ah oo xoog isticmaala ama ku hanjaba xoog, suural ah ku lug lahaansho koox gang ah
- **Ka ganacsi walxaha daroogada ah** - libinta mariwaanaada (xashiishad) ama daawada xanuunka loo qoro, suurta gal ah ku lug leh koox gang ah.



## DEMBI AAD URUR LA QABTID

Waalidiintu waa inay ogaadaan in dhalinyarada lagu soo oogi karo dembi “ay saaxiibadood la qabaan” haddii ay la socdaan saaxiibadood oo dambi galaya. Dhalinyarada waxay la kulmi karaan cawaaqib la mid ah sida kuwa dambiga galay.

## Waa maxay burcad (Gaang)?

Gaang waa koox ka kooban saddex qof ama in ka badan, kuwaasoo si rasmi ah ama aan ahayn isu abaabulay. Kooxdu waxa isticmaali kartaa magac, calaamad ama calaamad gaar ah. Xubnaha gang ah waxay sida caadiga ku lug leeyihiin dembiyada jidadka ka dhaca, waxayna bulshada geliyaan cabsi iyo argagax.

## MA OGTAHAY?

Ilmahaaga wuu ka qayb geli karaa kooxda burcad marka uu:

- Ilmahaaga jebiyaan sharciga marwalba;
- Saaxib la yahay koox burcad ah;
- Ilmahagu leeyahay qof qoyska ka mid ah oo burcad ah;
- Waxaa jira dhaqdhaqaaq iyo qorista burcada ee xaafada aad degan tihiin.



## MAXAA TAHAY XUQUUQDA ILMAHAAGA MARKA LAGU SOO EEDEEYO DEMBI:

- Xaq wuxuu u leeyahay turjubaan inuu helo.
- Xaq wuxuu u leeyahay inuu ogaado sabata loogu oogay ciqaabta iyo/ama askarta u xirtay.
- Xaq wuxuu u leeyahay inuu aamuso oo uusan la hadlin booliska xataa booliska marka uu baarayo.
- Xaq wuxuu u leeyahay inuu waco qareen telefoon lacag laan ah, ka hor inta uu la hadlin booliska marka qofka dhalinyarada lagu eedeeyo dembiga.
- Imahaaga waa inuu la hadal qareen takhasuskiisu yahay difaaca dembiyada.
- Qareenka wuxuu wakiil u yahay ilmahaaga, adiga kuuma aha. Wixii talo ah waa siin kartaa qareenka, laakiin qareenka wuxuu kula wadaagayaa xogta ilmaahaga ogolaado oo keliya.
- Xaq wuxuu u leeyahay inuu la hadlo waalidkiisa, dadka waaweyn oo uu ku kalsoon yahay, iyo/ama qareenka marka booliska wareysanayo, iyo in kuwaasi xaq uu leeyahay inay goobjoog ahaadaan marka ilmaha la wareeysanayo.
- Xaq wuxuu u leeyihiin xeer ilaalayaha dembiga ku cadeeyo inta ka hor qirashada dembiga (iyo inuu helo xogta diiwaanka kaga jirta qofka dhalinyarada ah).

## ARRINTA KU SAABSAN QIRASHADA

Ilmahaaga waa inuu la hadlaa qareenka difaaca dembiyada, ka hor inta uusan qiran inuu sharciga jebiyay. Qirashada oo loo diiwaangeliyo, waxay u keeni kartaa cawaacib xumo oo saameeysa fursadaha mustaqbalka sida arrimaha socdaalka, shaqada iyo/ama shaqooyinka iska wax u qabso ah, gelidda jaamacadaha, iyo kulliyadaha, iyo dhoofitaanka dibadda markuu Kanada ka baxayo.

# XUQUUQDAADA IYO MASUULIYADAADA WAALIDNIMO

## 1. Xuquuqdaada haddii booliska rumaysan yahay in ilmahaaga jebiyeen sharciga:

- Waxaad xaq u leedahay in lagu sheego sida ugu dhaqsiiyaha badan, marka ilmahaaga la siiyo tigidh, digniin, loo diro barnaamijka weecinta, la xiray iyo/ama la siiyaya taariikhda maxkamadda.
- Waxaad xaq u leedahay in lagu sheego doono af iyo/ama qoraal Marka la xiro ilmahaaga. Waxaad heli doontaa dokumenta oranayaa: magaca ilmahaaga, dembiga loo haysto, goorta iyo meesha ilmahaaga aadayo maxkamadda, iyo inuu xaq u leeyahay qareen.

## 2. Xuquuqdaada haddii ilmahaaga la xiray:

- Waxaad xaq u leedahay in lagu sheego af iyo/ama qoraal ah marka ilmahaaga la xiro.
- Inta badan, ilmahaaga waa la sii dayn doonaa, adiga iyo qof kale oo masuul ka ah marka la helo (kaasoo loo yaqaan dammiin)
- Haddii ilmahaaga lagu sii daayo adigoo ah daryeelahiisa, waxaad masuul ka tahay kormeerka ilmahaaga iyo inaad hubiso in ilmahaaga tago maxkamadda marka la rabo inuu tago iyo inuu raaco amarka iyo shuruudaha garsoorka.

## 3. Xuquuqdaada haddii ilmahaaga ay tahay in la geeyo maxkamad:

- Waxaad xaq u leedahay in lagu sheego af iyo/ama qoraal ah marka ilmahaaga la xiro, Waa la tagi kartaa ilmahaaga maxkamadda
- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato xogta ku saabsan ilmahaaga ee maxkamada.

## MA OGTAHAY?

- Haddi aad hayso warbixin ku saabsan dembi cidi samaysay, waxay taasi caawin doonta xalinta dembi, waxaad wicii kartaa booliiska ama dembi joojiyayaasha.
- Haddii aad wacdo dembi joojiyayaasha, kuma qasbanid inaad siiso magacaaga ama xog kale adiga qaas kuu ah .
- Dembi joojiyayaasha waxay bixiyaan abaalmarin lacag haddi xogta aad siiso lagu soo qabto oo la soo xiro dambiile. Wax badan ka baro oo booqo website ay leeyihiin oo ah [www.crimestoppers.ca](http://www.crimestoppers.ca)

## 4. Xuquuqdaada haddii ilmahaaga qirtay inuu galay dembi:

- Ka hor inta xaakimka dhalinyarada uu ku xukumi karo xabsi (xabsiga, xaakimka waa inuu tix gelyaa warbixinta xukunka ka hor. Warbixintaas uu buuxiyay sarkaalka asluubta dhaliyarada oo waraysanaya adiga iyo qof kale oo muhiim u ah noloshaha ilmahaaga (sida la taliyaashha ama macalamiinta)
- Dhibanaha ilmahaaga dembiga ku galay waalidkiisa wuu ku dacweyn karaa ayadoo tixtaacaya Xeer Masuuliyadda Waalidnimo. Dhibanaha wuxuu isticmaali karaa waraaqaha maxkamadda asagoo dacwad magdhaw lacag ah raadinaya maxkamada qaabilsan magdhowyada yaryar. Waxaa lagaa dalban karaa inaad bixiso ama siiso dhibanaha magdhawda hantida uu xaday, dhaawacay ama burburiyey ilmahaaga.

## MA OGTAHAY?

- Haddii ilmahaagu uusan haysan qareen oo 24 saacadooda soo socda laga rabo inuu maxkamad tago ilmahaagu wuxuu ladli karaa Ha'adda sharciga ee Lega Aid Duty Counsel oo lacag la'aan ah.
- Xafiiska la-talinta sharciga wuxuu ku yaalaa dabaqa kowaad ee guriga maxkamadda Ottawa.
- Ilmahagu waa inuu la hadlo la taliyaha sharciga ee maxkamadda maalinta maxkamadda, ka hor inta aysan bilaaban maxkamadda.



# ISTICMAAL ADEEGYADA DIYAARKA KUU AH



## ADEEGYADA BULSHADA: XAFIISYADA U ADEEGA SOO GALOOTIGA LOCAL AGENCIES SERVING IMMIGRANTS (LASI)

- Catholic Centre for Immigrants >> 613 232-9634 [www.cciottawa.ca](http://www.cciottawa.ca)
- Immigrant Women Services Ottawa >> 613 729-3145
- [www.immigrantwomenservices.com](http://www.immigrantwomenservices.com)
- Jewish Family Services >> 613 722-2225 [www.jfsottawa.com](http://www.jfsottawa.com)
- Lebanese & Arab Social Service Agency >> 613 236-0003
- [www.lassa.ca](http://www.lassa.ca)
- Le Conseil Économique et Social d'Ottawa Carleton >> 613 248-1343
- [www.cesoc.ca](http://www.cesoc.ca)
- Ottawa Chinese Community Services Centre >> 613 235-4875
- [www.occsc.org](http://www.occsc.org)
- Ottawa Community Immigrant Services Organization >> 613 725-0202
- [www.ociso.org](http://www.ociso.org)
- Somali Centre for Family Services >> 613 526-2075
- [www.scfsottawa.org](http://www.scfsottawa.org)
- World Skills Employment Centre >> 613 233-0453 [ottawa-worldskills.org](http://ottawa-worldskills.org)

## **ADEEGGA TURJUMIDDA QORAALKA IYO HADALKA (ADEEG LACAG AH)**

- Cultural Interpretation Services for Our Communities  
>> 613- 237-0502 / After hours >> 613 261-7834
- Language and Interpretation Services (IWSO)  
>> 613 729-1393 / After hours >> 613 784-0066
- Languages of Life Inc. >> 613-232-3770

### **COMMUNITY REFERRAL AND INFORMATION SERVICES**

- Newcomer Information Centre (YMCA-YWCA) >> 613 788-5000  
[www.ymcaywca.ca/Adults/nic/](http://www.ymcaywca.ca/Adults/nic/)
- 211 Ontario Helpline >> Dial 211 for community and social services in Ontario [www.cominfo-ottawa.org](http://www.cominfo-ottawa.org)
- City of Ottawa >> Dial 311 for community services in Ottawa

### **ADEEGYADA DEGDEGA IYO BADBAADADA:**

- Ottawa Police Service >> Dial 911 for emergencies  
>> For non-emergencies >> 613 236-1222 [www.ottawapolice.ca](http://www.ottawapolice.ca)

### **ADEEGYADA GARYAQAANADA IYO QAREENADA**

- Law Society Referral Service >> 1-800-268-8326 [www.lsuc.on.ca](http://www.lsuc.on.ca)
- Legal Aid Ontario >> 613 238-7931 / 1-800-668-8258  
[www.legalaid.on.ca](http://www.legalaid.on.ca)
- Ottawa Legal Information Centre >> 613 842-7462  
[www.centreinfojuridique.ca/en/](http://www.centreinfojuridique.ca/en/)

## MEELO KALE OO AAD KA HELAYSO XOG

- Stepping Stones – Ministry of Children and Youth Services (English and French) [www.children.gov.on.ca](http://www.children.gov.on.ca)
- Ottawa Gang Strategy (English and French)
- Crime Prevention Ottawa [www.crimepreventionottawa.ca](http://www.crimepreventionottawa.ca)
- Gang Prevention – A Parent’s Quick Reference Guide (many languages);
- City of Surrey [www.surrey.ca/community/12408.aspx](http://www.surrey.ca/community/12408.aspx)
- End Gang Life, Understanding Youth and Gangs, A Parent Resource (many languages); Combined Forces Special Enforcement British
- Columbia [www.cfseu.bc.ca/en/end-gang-life](http://www.cfseu.bc.ca/en/end-gang-life)
- Community Legal Education Ontario (CLEO) [www.cleo.on.ca](http://www.cleo.on.ca)
- Connecting Ottawa [www.connectingottawa.com](http://www.connectingottawa.com)
- Justice for Children and Youth [www.jfcy.org](http://www.jfcy.org)
- Department of Justice Canada [www.justice.gc.ca](http://www.justice.gc.ca)
- Ministry of the Attorney General [www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca](http://www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca)

## World Skills Employment Centre

300-219 Argyle Avenue, Ottawa ON, K2P 2H4

613-233-0453 [www.ottawa-worldskills.org](http://www.ottawa-worldskills.org)

Buugan waxaa qoray Laili Yazdani, oo ah Maamulaha  
Mashruuca Hoggaanka Iskuxidhka Bulshada ee Qoysaska  
(CLNF)

**Haddi aad faahfaahin dheeraad ah u baahan tahay,  
fadlan la xidhiidh  
Somali Centre for Family Services at: 613-526-2075**

## MAHADNAQ

*Anigoo ku hadlaya magaca Isbahaysiga LASI waxaan u mahad noqayaa dhamaan Hay'adda ka Hortagga Dembiyada Ottawa oo maalgeliyay Mashruucani muhiimka u ah bulshooyinke ku cusub dalka Kanada. Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa xubnaha guddiga joogtada ah kuwaasi oo ka qayb qaatay soo saaridda buugani oo kale ah:*

- Gord Boyd, Youth Services Bureau of Ottawa
- Ikram Ahmed, Somali Centre for Family Services
- Jessica Race, John Howard Society of Ottawa
- John Watters, Ministry of Children and Youth Services
- Kelly Reitsma, Public Prosecution Service of Kanada
- Laili Yazdani, World Skills Employment Centre
- Mercy Lawlubi, Immigrant Women Services Ottawa
- Mussie Habte, Catholic Centre for Immigrants
- Nathan Hoedeman. Ottawa Community Housing
- Sahra Habbane, Pinecrest-Queensway Community Health Centre
- Sharmaarke Abdullahi, Crime Prevention Ottawa
- Steve Sullivan, Ottawa Victim Services
- Tom Scholberg, Boys and Girls Club of Ottawa
- Vicki Hentz, Defence Counsel Association of Ottawa

*Final design and Somali language review by Abdirahman Osman.*